

Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee
[Tennessee Department of Human Services]
Arjiga Cayrta Gargaarka Qoyska
QEYBTAN SHAQAALAHA WAB [DHS] KALIYA
AYAA BUUXINAYAA



Arjiigaaga waan kaa guddoomeynaa haddii aad ku qorto xitaa kaliya magacaaga, cinwaankaaga, iyo saxiixaaga haddii aad kaliya dalbanaysid Barnaamijka Gargaarka ee Kabka Nafaqada [SNAP]/Kuubannada Cuntada [Food Stamps]. Laakiin marka aad macluumaad badan foormka aad ku qorto, waxaa dhici karta in adiguna aad sida ugu dhaqsaha badan aad u ogaato haddii kaalmo aad heli karto. Haddii lagu ogolaado, manfacyadaada waxay kuu bilaabmaysaa taariikhda arjiga aad inoo soo gudbisay. Badanaaba waxaad u baahnaa doontaa in aad la hadasho shaqaalaha WAB si loo dhameystiro socodsiinta arjiga.

Waxaa dhici karta in SNAP/Kuubannada Cuntada aad ku hesho 7 maalmood gudahooda haddii:

1. Daqliga qoyskaaga ka hooseeyo \$150, oo hadda aad haysato \$100 ama in ka yar.
2. Qarashka hoygaaga (lagu darey qarashka isticmaalka biyaha, korontada) uu ka badan yahay daqligaaga bisha loo geeyey inta kuu keydsan.
3. Aad ka shaqeyso shaqooyinka xiliyadda kooban laga shaqeyo ama aad tahay soo galooti xoogsato ah.

Case #: _____
 Date received: _____
 County: _____

Haddii aad tahay qof naafo ah oo ay kugu adagtahay in aad arjiga buuxiso ama aad fahamto waxa ku qoran, waan kaa caawin karnaa. Waan ku soo wici karnaa ama waan ku soo

Magaca		Waxaan dalbanayaa: ___Families First ___Lacagta SNAP /Food Stamps		
Cinwaanka/Adeerka Guriga		Waxaa laga yaabaa in telfoonka guriga ama gacanta aan kaa soo wacno si balanta lagu xusuusiyo. Fariin ayaan kuu duubi doonaa haddii aadan ka jawaabin.		
Degmada	Gobolka	Summada	Talefoonka Guriga	Talefoonka shaqada
			Telfoonka gacanta/Telfoon Kale	
Cinwaanka Warqadaha lagugu soo diro (haddii uu ka duwan yahay kan guriga)		Waxaan isticmaalnaa Lambarada Soshal Sekiyuuritiga si loo hubi in adigu aad tahay qofka aad sheeganayso. Waxaan u isticmaalnaa si aan u hubino in aad hesho cadada saxda ah ee caawinaada ee aad adigu xaq uleedahay, in la bedello cadada caawinaad ee aad hesho, in la hubiyo diiwaangelinta kombiyuutarada dowladda, iyo si loo hubiyo in aad xaq u leedahay iyo in kale. Waxaan hubinaa Soshal Sekiyuuriti, IRS, iyo diiwaangelinta shaqada. Waxaa dhici karta in aan hubinno diiwaangelinta Laanta Socdaalka iyo Dhalashada. Haddii diiwaangelintan iyo waxa aad noo shegayso aysan iswaafaqsanayn, waxaa dhici karta in aameyn ay ku yeellato haddii aad heli la'hayd caawimaad iyo inta lacag ama Kuubannada Cuntada ee aad heli la'hayd. Haddii aad bixiso macluumaad aan-sax-ahayn adigoo ulajeedaadu ay tahay in kaalmo aad ku hesho, xabsi ayaad ku mutaysan kartaa.		
Degmada	Gobolka	Summada		
Ma u baahan qof kuu tarjuma? () Haa () Maya Haddii jawaabtaada ay haa tahay, luqaddee? _____		Macluumaadka ku saabsan Isirka/Qowmiyadda aad ka soo jeedo, taas dowladda Gobolka waxay ka caawinnaysaa in ay u hog'aansan yihiin sharciyada xuquuqda dad-waynaha. Fadlan kuwa soo socda u isticmaal si jinsigaaga aad inoo sheegto: W = Caddaan/ Yurubiyani, B = Madaw/Afrikan-Amerikan, A = Aasiyan, H = Hawaiiian Dhalad/Jasiirada Pacific, I = Cali Beesteen/Alaska Dhalad (Aqalka qoyskaaga is Maya koorsooyinka la iska doonaayo oo to sii annaga macluumaadkaan iyo it xisaabin saamayn canugaaga xaq ulahaanshaha or faa'iido heerka.) Xaaladdaada Guur: Kalmadaha soo socda ku qor ama calaamadee xubnaha aqalka qoyska ee qaangaarka ah xaaladdooda guur: guursaday, doob, isfurey, laga dhintey, kala maqan		

Ku qor qof kasta ee aqalka qoyskaaga ku nool ama degan (adigana isku dar) Si aad ugu darto dad badan, fadlan arji kale ama warqad kale ku soo qor oo ku lifaaq	Manfac/cayr miyuu dalbanaya qofkan? (Haa/Maya)	<u>(Looma baahna in aad ku qorto haddii qofka uusan rabin inuu manfac helo)</u> Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, eeg bogga 1 aad ee Bayaanka Heshiiska Isfahamka		Jinsi (Lab/Dh eddig)	(Buuxinte eda waa ikhtiyaar) Calaamad da saxda ah saar haddii Isbaanish /Latino yahay/ Laatino	(Buuxinteeda waa ikhtiyaar) Isir (kor fiiri) Kuwa ku quseeya oo dhan calaamadee	Xaaladda Guurka (kor fiiri)	Taariikhda Dhalashada	Calaamadda saxda ah saar haddii qoftan ay uur leedahay	Calaamadda saxda ah saar haddii qofkan yahay qof curyaan ah
		Lambarka Soshal Sekiyuuritiga	Calaamadda saxda ah saar haddii qofkan uu haysto dhalashada Mareykanka							

Waxaan ku dhaaranayaa iyada ciqaab lagu mutaysan karo beenta (beesheegida adigoo lagu dhaariyay) iyo dhammaan ciqaabyada kale la mutaysan karo in qoraalka aan arjigan ku qorey, kuwa kulifaaqan, iyo qofkasta oo iwareysan doono yahay mid run oo sax ah. Dhammaan shaqsiyaadka caawinaada codsanaya ama kuwa caawinaada qaata ay yihiin kuwa haysta dhalashada Mareykanka, sharci wadanka lagu joogo, ama soo galooti xaq uleh. Waan ogsoonahay oo waan kuu raacsan nahay shuruudaha iyo macluumaadka la i siiyay. Haddii la isoo weydiisto, waxaan bixin doonaa macluumaadka caddeynaya qoraalkayga, ama WAB waxaan fasax u siiyay in ay caddeyn la timaado. Waan ogsoonahay in la iga rabo in WAB [DHS] aan u soo sheego isbaddel kasta oo xaaladdayda ku timaada.

Macluumaad bixinta: Dowladda Gobolka Tennessee ama kuwa ushaqeyya waxaa dhici karta in ay ubaahdaan macluudka aan anigu siiyay yahay mid run ah oo iyagu soo habsan doona. Aniga oo warqaddan saxiixaya, waxaan iyaga aan usheegayaa in caddayn ay raadsan karaan. Tani waxay u ogolaan doontaa in y go'aamiyaan haddii la isiinayo Kuubannada Cuntada [Food Stamps], Mudnaanta Qoyska [Families First]. Sidoo kale waxaan halkan ku caddaynayaa inaan aqriyay oo aan fahmay Bayaanka Heshiiska Isfahamka.

Saxiixa: _____ **Taariikhda:** _____ **Markhaati (haddii X lagu saxiixay):** _____ **Taariikhda:** _____

Wakiilka Awoodda loo siiyay ama Mas'uulka: _____ **Taariikhda:** _____

Sanduuqan waxaa buuxinaya oo kaliya kuwa dalbanaya Mudnaanta Qoyska [Families First]: Idan lagu sii bixinayo diiwaangelinta isa soo xaadirista iskuulka

Aniga (macmiilka) ahaan waxaan iskuulka aan idan u siinayaa inay bixiyaan diiwaangelinta soo xaadiraanka [attendance] caruurteyda ee la socda arjigan la siiyo Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee oo ay bixiso Waaxda Waxbarashada ee Tennessee ama iskuulka canugayga. Waaxda Adeegyada Bulshada diiwaangelintan way isticmaali doontaa, iyadoo ay la socoto lambarada soshal sekiyuuritiga, waxay iga caawinaysaa inaan ka soo baxo waajibaadyadeyda Mudnaanta Qoyska. Diiwangelinta waa la jejeexi doonaa mar haddii laga dhammaysto oo aanan loo baahnayn.

Saxiixa: _____ **Taariikhda:** _____

Waan ogsoonahay in ay dhici karto in aan leeyahay hal ama laba ah wakiil oo aniga imatala:

_____ qofkaas aniga wuu ii dabi karaa manfacyada: Cayrta SNAP/Food Stamp () ; Mudnaanta Qoyska [Families First] () way ii isticmaali karaan cayrta/Kuubannada Cuntada [Food Stamp] () ; aniga ii isticmaalo manfacyada Mudnaanta Qoyska ()

_____ qofkaas aniga wuu ii dabi karaa manfacyada: Cayrta SNAP/Food Stamp () ; Mudnaanta Qoyska [Families First] () manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada aniga ii isticmaalo () ; aniga ii isticmaalo manfacyada Mudnaanta Qoyska ()

Diiwaan-gelinta Coddeynta

Ma diiwaangashan tahay in doorashada aad ka coddeyso halkan aad deggan tahay? () Haa () Maya

Miyaad jeceshahay in coddeynta isu diiwaangeliso? () Haa () Maya

Ma jeceshahay in WAB [DHS] ay kuu soo dirto foormka diiwaangelinta coddeynta? () Haa () Maya

Manfacyada laga yaabo inaad ka hesho xafiiska WAB [DHS] isma baddeli doonaan haddii aad isdiiwangeliso in aad coddeyso ama in kaleba.

Sanduuqyada hoose ku qor macluumaad ku saabsan DAQLIGA aqalka qoyskaaga. Daqligu waxaa ka mid ah balse kuma koobna oo kaliya kan shaqada, kan iskaa- aad ushaqeysto, masruuf, masruufka ilmaha, manfacyada dadka tabarta-daran, Soshal Sekiyuuriti/Daqliga Soshal Sekiyuuratiga, Magdhawga Shaqo, Manfacyada baagamuudo, lacagta howl-gabka, mushahar, iyo daqli dulsaar ah.

Dadka Daqliga uu soo Galo canshuur/qarashaadka	Daqliga kaa soo galo (sida shaqada, Soshal Sekiyuuriti, masruufka ilmaha)	Lacagta bil kasta soo gasha intaan laga jarin canshuurta/qarashaadka

Ku qor hantida ama halka dhaqaalaha qoyska ay ka helaan oo dhan sida (lacag naqdi, mid keydsan, jeekinka, ama koontada bangiga, keydsan, saaniyad, boond, mujuwal fands, koontooyinka howl-gabka, tarasta fands, daqli-sanadle, ama hanti kale)

Nooca: _____ **Qiimaha:\$** _____ **Nooca:\$** _____ **Qiimaha:\$** _____

Nooca: _____ **Qiimaha:\$** _____ **Nooca:\$** _____ **Qiimaha:\$** _____

Xubin kasta oo qoyska ka tirsan hadduu jebiyo mid ka mid ah xeerarkan waxaa dhici doonta in laga joojiyo in la siiyo cayrta SNAP/Kuubannada Cuntada hal sanno ilaa iyo abad, lana ganaaxo in ka badan \$250,000, lana xiro in ka badan 20 sannadood ama labadaba. Sidoo kale isaga ama iyadu waxaa lagu qaadi doonaa tallaabo sharciya waafaqsan kaa soo hoos yimaada sharciyada Federaalka ama dowladda Gobolka. Waxaa dhici karta in isaga ama iyada laga mamnuuco in ay qaataan manfaca Barnaamijka SNAP/Kuubannada Cuntada ilaa 18 bilood oo dheeraad ah haddii ay maxkamadda amarto. Kaarka EBT qofna ha ka iibin ama wax kale haku badalin, ama kaarka qof kale ha u oggolaan inuu isticmaalo ama ay isticmaasho.

Waxaa laga yaabaa in manfacyadaada SNAP/Kuubannadaada Cuntada [Food Stamps] lagu siiyo lagaa joojiyo haddi aad:

*Nasiiso macluumaad aan jirin ama haddii aad wax naga qariso si aad u qaadata manfacyada Kuubannada Cuntada darteed;

*Isticmaasho Kaarka Manfaca oo qof kale lee yahay iyaga oo aan kuu fasaxin;

*Manfacyada SNAP aad ku soo iibsato sida qamri, sigaar, ama saabuun ama dayn aad isaga guddo.

Haddii xeerarkan aad jebiso, ma qaadan doontid manfacyada SNAP/Food Stamps ilaa:

1 sano waa marka koowaad ee lagugu qabto, marka labaad 2 sano, oo marka seddexaadna weligaaba ma qaadan doontid.

Haddii manfacyada SNAP/Food Stamp lagu siiyo aad daroogo ku baddelato. Manfacyada waxaa lagaa jari karaa ilaa:

2 sano waa marka koowaad iyo marka labaad weligaaba ma qaadan doontid.

Abid ayaa lagaa jari doonaa Barnaamijyada/SNAP/Food Stamp haddii lagu helo dembi ah in:

*Manfacyada SNAP/Food Stamp aad ku badellato hub, rassaas, ama walxaha qarxa ama walxaha kontorbaanka ah(muqaadaraadka sharci darada ah);

*Aad sii iibiso manfacyada SNAP/Food Stamp ee udhigma \$500 ama ka badan.

Haddii macluumaad aan sax ahyn oo adiga ama qofka aad u dalbanayso aad na siiso ama halka aad deggan tahay si aad u qaadata ama aad u hesho manfacyada SNAP/Food Stamp. Haddii aad sheegto macluumaad aan jirin taasi waxay kaa horistaagi doontaa in 10 sannadood oo dhan aadan helin wax SNAP/Food Stamp ah.

Dimbiile Dowladda Dhexe iyo/ama Dowladda Gobolka:

Adiga dambi ma lagugu helay ama ma jiraa qof kale oo degan aqalka qoyskaaga oo lagu heley dembi ah inaad qaadatay Caawinaada Kumeel-gaarka ee Qoyska (TANF) (lacagta naqdiga ah) ama manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada oo isku mar ka wada qaadatay laba ama in ka badan oo gobol? Haa__ Maya__

Ma jiraa qof idinka idin ka mid ah oo lacagta TANF u isticmaalay meel ka mid ah meelaha soo socda sida dukaamada qamariga, kasiinos [meelaha qamaarka], qololka qamaarka, meelaha maaweelada ee dadka qaangaarka ah ay booqaan, hoolalka qamaarka, meelaha tartanka? (TANF kaliya) Haa__ Maya__

Adiga ama xubin qoyskaaga ka tirsan weli ma lagu helay adigoo ama idinka oo iibsannaya ama sii iibinnayada manfacada SNAP/Kuubannada Cuntada oo ka badan \$500? Haa__ Maya__

Adiga ama xubin qoyskaaga ka tirsan miyaa lagu xukumay dambi-wayn sababtoo ah dhaqan la xiriira haysashada, isticmaalka ama qaybinta walxahaha daroogada kontorbaanka laga soo bilaabo 08/22/96 (SNAP/Kuubannada Cuntada & TANF)? Haa__ Maya__

Miyuu jiraa xubin qoyskaaga ka tirsan ama adiga oo dhuumaashi ama ka carraya sharci si aan dambi loogu qaadin darteed, aan la xirin darteeda, ama xabsi loo diro darteed, dambi-wayn ama isku day dambi-wayn, ama gef u gaystay shuruudii tijaabada ama geffaf u gaystay tijaabayntii? Haa__ Maya__

		Adiga ama xubin ka tirsan qoyskaaga ma lagu helay dambi ah beddelashada SNAP/Kuubannada Cuntada [Food Stamp] si aad ugu iibsato daroogo? Haa ___ Maya ___	
<p>Haddii aad tahay qof jira inta udhaxaysa 18 ilaa 24 sanno jir, adiga marka aad carruur ahayd abad ma gashay gacanta dowladda gobolka? Haa ___ Maya ___</p> <p>Qarashaadka Daryeelka Carruurta Inta sitimaankii aad bixiso: \$ _____</p> <p>Magaca qofka carruurta daryeela: _____</p>	<p>Qarashka Guryaha inta aad bixiso Ijaarka /Daynta Guryaha (mid goobaabi geli)</p> <p>Bishiiba meeqaa: \$ _____</p> <p>Gaas/Korontada \$ _____ bishiiba</p> <p>Telfoon \$ _____ bishiiba</p>	<p>Qarashka Daawada Ku qor qarashka daawada sida takhtarka tan uu qor ama lacagta joogta ah ee caymiska la siiyo. Kuwani waxay kaa caawinayaan Kuubannada Cuntada [Food Stamps] oo bada aad hesho haddii aad tahay qof da' ah ama itaal-daran.</p> <p>Nooca: _____ \$ _____ bishiiba</p> <p>Nooca: _____ \$ _____ bishiiba</p>	<p>Masruufka ilmaha ee aad Bixiso Haddii adiga sharci ahaan lagugu waajibiyay in aad bixiso; masaruufka carruurta ee aad siiso canug ama carruur halkan ku qor magaca/yada canuga/ilmaha:</p> <p>Magaca canuga: _____ \$ _____ bishiiba</p> <p>Magaca canuga: _____ \$ _____ bishiiba</p>
<p>Hey'addan waxaa ka mamnuucan inay sameeyaan falal takoor ah ayada oo sal uga dhigeysa jinsi, midab, asal qaran, lab/dhiddig, da', diin, siyaasad ahaan wax uu qofka aamisan yahay ama la'xaad daro. Waaxda Beeraha ee Maraykanka ayaa sidoo kale mamnuucaysa wax takoor ah oo lagu saleeyo jinsi, midab, asal qaran, jinsi, caqiido, naafanimo, da', siyaasad ama aargudsi ama aar-gudasho howlo kale ee aad horey ugu jirtay darteed ee la xiriira barnaamij kasta ama howlo kale ee ay hay'adda qaban jirtay ama USDA ay maalgelisay. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaabab kale oo hay'adda lagula soo xiriira sida in ay macluumaad ka helaan oo u baahan ama isticmaala (tusaale ahaan Braille, daabacaad far wa wayn, cajal, Luqadda Dhagoolayaasha, iwm.), waa inay la soo xiriiraan Hay'adda (Gobolka ama degmada) waa halka cayrta ay ka dalbadeen. Dadka maqalka dhibka ku ah, maqalka ku adag ama hadalka dhib ku ah waxaad u wici kartaa USDA iyagoo Federal Relay Services in maraayaan (800) 877-8339 Waxaa intaa dheer, barnaamijyada aan bixinno oo luqad aad fahmi karto ama luqaddaada aad ku hadasho oo aan af Ingiiir ahayn ayaan kuugu soo diri karnaa. Haddii aad jeceshahay inaad soo gudbiso cabasho takoor ah oo ku aaddan Barnaamijka Xuquuqda Dad-weynaha USDA u soo dirsato, soo dhammaystir Foormka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA ee (AD-3027) aad ka helaysid qatka online-ka ee http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, ama waxaad ka heli kartaa xafiis kasta ee USDA leedahay si foormka aad u cudsato. Si aad u dalbato nuqdi ka mid ah foormka cabashada, soo wac (866)632-9992 si foorm aad u dalbato. Foormka cabashada oo dhammaystiran ama warqadda waxaad ku soo diri kartaa boostada oo u dir U.S Department of Agriculture, Office of the Assistant Secretary for Civil Rights, 1400 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20250-9410, ama fakis (202) 690-7442 ama email ku program.intake@usda.gov. Macluumaad kale oo kasta ee la xiriira arimo Barnaamijka Gargaarka ee Kabka Nafaqada (SNAP) ku saabsan, shaqsiyaadka waa inay ula xiriiraan USDA SNAP Lambarka la Waco oo ah (800) 221-5689, ka soo sidoo kale af Isbaanish ama wac Macluumaadka Gobolka qatka internetka oo ah http://www.fns.usda.gov/snap/contact_info/hotlines.htm. Si aad u soo gudbiso cabasho takoor ee ku saabsan barnaamijka hela gargaar dhaqaale ee dowladda dhaxe ah oo loo soo mariyo Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka ee Mareykanka (HHS), u qor HHS Director, Office for Civil Rights, Room 515 F, 200 Independence Avenue, S.W., Washington D.C. 20201 ama wac (202) 619-0403 (cod) ama (800) 537-7697 (TTY). Hay'addan fursaddaha ay bixiso dadka way u wada sintaa. Sidoo kale waxaad u soo qori kartaa Tennessee, Department of Human Services, Office of General Counsel, Compliance Officer, Citizens Plaza Building, 400 Deaderick Street, Nashville, TN 37243, (615) 313-4700.</p>			



Ma ubaahan tahay in aad noo sheegto wax isbaddel ah? Ma qabtaa wax su'aal ah?
Ma u baahan tahay caawinaad? Na soo wac. Wacitaanku waa bilaash.

Xarunta Adeegga Gaargaarka Qoyska
1-866-311-4287

Waxaan halkan u joognaa inaan ku caawino laga bilaabo
7 a.m. ilaa 5:30 p.m. Isniinta ilaa iyo Jimcaha.

Bayaanka Heshiiska – Shuruudaha Barnaamijka Warqaddan waa muhiim – Warqaddan Xafid!

Haddii aad tahay qof naafo ah ama itaal daran oo aad u baahan tahay gaargaar gaar ah, fadlan nala soo socodsii.

TURJUMAAN BILAASH AH -- Haddii af Ingiriisiga aadan si fiican u fahmeyn oo aad u baahan tahay qof turjumaan ah oo ku caawiya, fadlan nala soo socodsii. Waxaan kuu helaynaa turjumaan kaa caawin doona oo kuu tarjuma. Adeeggan tarjumaanka waa mid bilaash ah. Ilaa tarjumaan laga helaayo micnaheedu ma ahan in kiiskaaga dib loo dhigaayo. Arjigaaga [application] kaaga isla maantaba waan kaa guddoomi karnaa.

Xafiiska DHS **ayaad ka soo dalban kartaa wixii manfac ah ee la bixisyo sida Mudnaanta Qoyska [Families First] ama Cayrta SNAP/Kuubannada Cuntada [Food Stamp]**. Arjiga waa in si dhameystiran loo buuxiyaa oo arjiga DHS waxaa laga heli karaa qatka internetka oona lagu dhameystiri karaa ama xafiiska DHS ayaad ka buuxin kartaa. Foormkan waxaad u isticmaali kartaa hal barnaamij ama waxaad u soo isticmaali kartaa in ka badan hal barnaamij ama manfaca barnaamijka SNAP/Kubaannada Cuntada kaliya aad usoo dirsan kartaa. Arjigaaga SNAP/Kuubaannada Cuntada kaliya looma diidayo iyadoo lagu salaynayo in arjigaaga oo aad barnaamij kale ku dalbanayso oo kaliya lagugu diido haddii mid lagu diido micnaheedu ma ahan in barnaamijyada kale lagu diidayo. Waa in aad na siisaa ama aad noo keentaa caddeyn qofka aad tahay, daqliga ku soo gala, iyo xaqiiqooyin kale ee loo baahan yahay si loo ogolaado arjigaaga. Haddii aad caawinaad ugu baahan tahay si caddaynta aan ku waydiino aad noogu keento, weydii shaqaalaha kiiskaaga ee DHS.

Haddii adiga ama shaqsi kale oo aad u dalbayso xaq u yeelashada manfaca, manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada ama manfacyada TANF waxaa la siin doonaa laga bilaabo taariikhda aan helno arjiga oo ku qoran magacaaga, cinwaankaaga iyo saxiixaaga. Taariikhda la soo dalbaday way ka duwaan doontaa haddii qofka soo dalbanayo uu ku jiro xabsi oo isla markaana soo dalbannayan manfaca SNAP iyo Daqliga Soshal Sekiyuuratiga [SSI]. Arrinka marka sidan oo kale uu yahay, taariikhda la soo gudbiyay waxaa looga bilaabayaa taariikhda qofka xabsiga laga soo daayo.

- **Qofkasta oo ka tirsan aqalka qoyska oo dalbanaya manfacyada Families First ama SNAP/Kuubannada Cuntada [Food Stamp]** waa inuu bixiyaa Lambarka Soshal Sekiyuuritiga [Social Security Number] ama sharcigooda dhalashada ama sharciga wadanka ay ku joogaan. Xeerka Nafaqada iyo Cuntada wuxuu noo ogolaadaa in lambarada Soshal Sekiyuuritiga aan isticmaalno si aan markaa u hubino in aad heleyso caddada saxda ah ee cayrta, la beddelo caddada saxda ah ee aad hesho, si aan uga fiirino diiwaangelinta dowladda iyo kombiyuutarada, iyo si aan u hubino in aad gargaarka u qalanto. Goorta aan diiwaangelinta kombiyuutarka ka eegeyno, waxaan isticmaalnaa Nidaam Lagu Cadeeyo Xaq u la'haanshaha Daqliga. Haddii diiwaangelintan aysan iswaafaqsanayn waxa aad dhahayso, saameyn ayay ku yeelanaysaa haddii aad heli la'hayd caawimaad iyo inta lacag ama SNAP/kuubannada cuntada ee heli la'hayd. Haddii aadan haysan lambarada Soshal Sekiyuuritiga, waan ku caawin karnaa in aad mid weydiisato.
- Haddii aad haysato Lambarka Soshal Sekiyuuritiga, oo aad tahay muwaadin Mareykan ah, ama aad haysato sharci degnaanshaha ama soo galooti xaq u leh, markaa waa in aad manfacyada aad soo dalbataa haddii aad tahay xubin qoyska ka mid ah.
 - Tusaale ahaan: Sayga/xaaska iyo caruurta iyo waalidiintooda waa in ay isla soo dalbadaan, aysan ka ahayn haddii aad iska dhaafeyso in aadan u dalabto manfacyada qof aanan dooneyn in uu bixiyo lambarada Soshal Sekiyuuritiga (SSN) ama xaaladdooda degnaansho.
- Xafiiska DHS **uma baahna** lambarada soshal sekiyuuritiga ama sharciga dhalashada/soo galootiga si xubnaha qoyska ay manfacyo u dalbadaan. Haddii lambar Soshal Sekiyuuritiga uu la yimaado qof aanan ka ahayn qofka manfaca dalbana, looma dirayo Waaxda Socdaalka iyo Dhalashada (Immigration and Naturalization Services) si loo caddeeyo xaaladdooda degnaansho.

- Adiga cayrta waad u dalbi kartaa qof dhalashada haysta iyo dadka shisheeyaha ee xaq u leh xitaa haddii adigu aadan dalbanayn manfacyada ama cayrta.
- Shaqsiyaadka aan manfacyada soo dalbanayn ayaa sidoo kale weli la xisaabi doonaa daqliga soo gala iyo lacagaha kale ee soo gala.

Haddii xafiiska DHS aad caawinaad ka dalbanayso, waxaa laga yaabaa in Lambarka Soshal Sekiyuratigaaga aan siino:

- Bilayska raadinaya kuwa sharciga jabinaya waxaan bixinnaynaa goorta sharciga inoo ogol yahay ama inooga baahan yahay ama goorta ay maxkamadda inagu amarto.
- Hay'addaha kale ee dowladda dhexe ama gobolka haddii sharciga inoo ogol yahay ama inooga baahan yahay in aan bixino.

Muddo ilaa intee ayay inagu qaadanaysaa in arjigaaga aan go'aan ka gaarno?

- Manfacyada Families First ee lacagta naqdiga: Waxaan haysanaa ilaa 45 maalmood oo aan go'aan uga gaarayno haddii lagu siin karo.
- SNAP/Kuubannada Cuntada [Food Stamps]: Waxay qaadan kartaa ilaa 30 maalmood in aan go'aamino haddii aan ku siinayno SNAP/Kuubada Cuntada waa haddii aad u qalanto.
- Si waqtiga loogu talagaley aan go'aan uga gaarno, xafiiska DHS waa inaad naga caawisaa si aan u heli la'hayn dhamaan caddeynmaha aan u baahan nahay.

Shaqaalaha kiiskaaga ayaa kuu sheegi doona isbadellada lagaa doonayo in aad soo sheegto. Haddii Families First aad qaadato, waa in aad 10 maalmood gudahooda ku soo wargelisaa xafiiska WAB (Waaxda Adeegga Bulshada) isbadel kasta ee ku yimaada xaaladdaada nolol.

Haddii aad qaadato Kuubannada Cuntada [Food Stamps] waa in aad soo sheegtaa goorta daqliga ku soo gala bisha dhaafo Xadka Daqliga Guud ee SNAP/Kuubannada Cuntada ee aqalka qoyskaaga. Shaqaalaha kiiskaaga ayaa kuu sheegi doona caddada inta ay tahay. Wax kasta oo isbadelkan waa in aad nagu soo wargelisaa bisha xigta 10 ka dib marka isbadelka uu dhaco.

Xogta la Xiriira Cayrta SNAP/Food Stamp:

Manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada wax kama baddeleyso manfacyadaada Families First. Haddii ay joogsato lacagta naqdiga ah ee Families First, weli waad heli kartaa manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada [Food Stamps]. Laakiin haddii aad bilowdo in aad qaadto Mudnaanta Qoyska [Families First], waxaa dhici karta manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada ee aad qaadato ay hoos u dhacdo. **Isbadelkan waa lagu soo wargelin doonaa; Inkastoo, ay dhici karto in isbadelkan kugu soo gaarto in yar tobon maalmood ka hor inta manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada ay hoos u dhicin.**

Waxaa laga yaabaa in manfacyadaada SNAP/Kuubannadaada Cuntada [Food Stamps] ee lagu siiyo lagaa joojiyo haddi aad:

- Bixinta macluumaad aan jirin ama in la qariyo xaqiiqo si loo qaato manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada;
- Ama aad isticmaasho Kaarka Ammaanka Manfaca [Benefit Security Card] ee qof kale lee yahay iyaga oo aan idan ku siin ama aad ka badellato ama iibiso Kaarka Ammaanka Manfaca;
- Manfacayda SNAP/Kuubannada Cuntada aad ku soo iibsato sida qamri, sigaar, ama saabuun ama dayn aad isaga guddo
- Manfacyada SNAP/Kuubaannada Cuntada lagu bixiyo cunto dayn lagu soo qaatay.

Haddii xeerarkan aad jebiso, ma qaadan doontid manfacyada SNAP/Food Stamps ilaa:

- Marka koowaad 1 sano.
- Marka labaad 2 sanaddood.
- Marka seddexaad weligaaba laguma siinaayo.

Haddii manfacyada SNAP/Food Stamp lagu siiyo aad daroogo ku baddelato. Manfacyada waxaa lagaa jari karaa ilaa:

- Marka koowaad 2 sano.
- Marka labaad weligaaba laguma siinaayo.

Abadkeedaba waa lagaa jarayaa Barnaamijka SNAP/Kuubannada Cuntada [Food Stamp] haddii ay maxkamadda kugu caddeyso in aad gashey dembi ah:

- Manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada u baddelatay qori, rassaas, ama waxyaabaha qarxa.
- In aad sii iibiso manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada ee udhigma \$500 ama ka badan.

Manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada ma heli doontid ilaa toban (10) sannadood haddii aad been ka sheegto qofka aad adigu tahay ama halka aad ku nooshahay si aad u hesho manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada.

Haddii aaddan raacin qorshaha Families First, waxaa dhici karta inaan jarno lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska ama manfacyada SNAP/Kuubannada Cuntada la yareeyo.

Haddii aad ka warbixin daqligaaga shaqada ama lagugu helo in aad jebisey shuruudaha Barnaamijka SNAP/Kuubannada Cuntada adiga oo ulakac u sameeyey, waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto in aad soo celiso lacagtii lagu siiy haddii aad qaadatay manfacyo badan oo SNAP/Kuubannada Cuntada ah.

Dadka jebiya shuruudaha waxaa dhici karta in ay xabsi u aadaan, ee uu qabto sharciga dowladda dhexe, ama la ganaaxo ilaa iyo \$10,000 ah. Haddii dacwad SNAP/Kuubannada Cuntada ah ay soo baxdo oo lid ku ah aqalka qoyskaaga, macluumaad ku qoran arjigan, oo uu ku jiro lambarka SSN, waxaa dhici karta in lagugu wareejiyo hay'addaha dowladda Federaalka ama tan Gobolka, sidoo kale hay'addaha lacag ururinta u qaabilsan ee gaarka loo leeyahay, si tallaabo lacag ururin ay qaadaan.

Xubnaha qoyska qaarkood waa in ay iska diiwaangeliyaan shaqo haddii ay doonayaan in ay helaan SNAP/Kuubannada Cuntada. Shaqaalaha kiiskaaga ayaa kuu sheegi doona qofka hoygaaga jooga ee u baahan inuu iska diiwangeliyo si aad u heshaan. Marka arjigaan aad saxiixayso, waxaad ku raacsan tahay in qof kasta oo aqalka qoyskaaga degan aad qorayso ama qortay. Haddii tani ay dhacdo, kuwa looga baahan yahay in ay is diiwaangeliyaan inay aadaan Waaxda Hormarinta Shaqada iyo Shaqaalaha (Department of Labor and Workforce Development) (DOLWD) si waraysi loola yeesho. Waxay kaala shaqayn doonaan si aad u heli la'hayd shaqo adiga kugu haboon oo aad ka shaqayn karto. Dadka aqalka qoyska ka tirsan qaarkood waxaa dhici karta in looga baahdo in ay ka qaybqaataan shuruudaha Shaqada iyo Tabbabarka si xaq u la'haanshahooda ay u sii socoto. Sidoo kale waa inaad ogolaataa oo aad xafidaa shaqo adiga kugu wanaagsan. Shaqsiyaadka diida in lagala shaqeeyo shaqo raadinta iyadoon wax cudurdaar ah aysan haysan waxaa dhici karta in manfaca SNAP ta laga gooyo.

Qof Qaangaar Ah Oo Shaqayn Kara Oo Isku Filan [ABAWD] waa qof qaangaar ah oo da'doodu u dhaxayso 18 ilaa 49 sanno jir oo aan ku tiirsanayn dadka aqalka qoyska, aysan ka ahayn haddii qofkaas aan looga baahnayn, waxa kaliya uu uqalmi karaa seddex (3) bilood ee manfacyada SNAP ee seddex (3) sano aysan ka ahayn haddii qofkaas aysan ka qayb qaadanayn shuruudaha shaqada ee SNAP. Laga bilaabo 1da bisha Janaayo, 2016, shuruudaha shaqada SNAP ee ABAWD waxay noqon doonaan:

- Qofka waa inuu shaqeeyaa ugu yaraan isku celcelis 20 saacado sitimaankiiba (80 saacado bishiiba) ama in ka badan, AMA
- Qofka waa inuu ugu yaraan ka qaybqaataa barnaamij tababarro oo la ogol yahay isku celcelis 20 saacado sitimaankiiba (80 saacado bishiiba) ama in ka badan

Barnaamijka tababarka ee la ogolaan kara waxaa laga bixiyaa Waaxda Horumarinta Shaqada iyo Shaqaalaha [Department of Labor and Workforce Development] wuxuu noqon karaa:

- Barnaamij hoos yimaada Xeerka Kobicinta Shaqaalaha iyo Fursaddaha ee 2014;
- Barnaamij hoos yimaada Xeerka 1974 ee Ganacsiga qeybtiisa 236; AMA
- Dhigta ama Taga Iskuul Lagu Barto Waxbarashada Aassaasi (ABE)

Dadka ABAWD ka qaybqaata cayrta SNAP waxa kaliya ay xaq u yeelan karaa seddex (3) bilood ee soddon iyo lixda (36) bilood ama mudo seddex (3) sannad laga bilaabo 1 bisha Janaayo, 2016.

Waxaa laga yaabaa in aad hesho manfacyo badan ee SNAP/Kuubannada Cuntada [Food Stamp] haddii aad hayso caddeymo ah qarsh sida kuwan soo socda:

- Caafimaadka
- Xannaanayn caruur ama qof mas'uul aad ka tahay
- Masaruufka caruurta
- Hoy ama qarashka isticmaalka biyaha, korontada, iwm.

Shaqaalahaaga xafiiska DHS ayaa kaa caawin kara in aad hesho caddeymo. Laakiin waa in aad nagu soo wargelisaa qarashyada oo waa in caddeymo aad na tustaa. Haddii qarashkan aadan inoo sheegin oo aadan na siin waxii caddeyn ah, waxaan u qaadanaynaa in aadan doonayn in laga jaro qarashka kaaga baxa oo ma haleysid manfacyada Kuubannada Cuntada dheeraad ah ee lagu siin la'haa.

Xogta Families First:

Haddii aad qaadato lacagta naqdiga ee Families First ee aadan u qalmayn, waa in aad Gobolka dib ugu soo celisaa. Waxaad:

- In aad ka bixiso lacagta naqdiga ee Families First.
- Lacag naqdi ahaan ku bixiso, haddii Families First aad qaadanaynin.

Haddii aad bixiso macluumaad aan jirin ama xaqiiqda aad qariso si aad u hesho lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska [Families First], maxkamadda ayaa lagu saari karaa. Waxaa lagugu eedeeyn karaa been abuur (adigoo dhaar qaba been sheegay), xatooyo ama dembi kale, oo waxaa laga yaabaa in waqti lagu xero oo aad xabsi ku gasho. Haddii aad si ulakac ah u jebiso jebiso shuruudaha Mudnaanta Qoyska, tani waxaan ugu yeeraanaa Xadgudub Barnaamijka oo Ulakac ah. Haddii dambi lagugu helo, waxaa manfacyada Mudnaanta Qoyska lagaa jari karaa ilaa:

- Marka ugu horeyso 6 bilood;
- Marka labaad 1 sano; oo
- Marka seddexaad weligaaba

Waa sharci daro in aad laba gobol isla mar ka wada qaadato lacag naqdi ah. Qof kasta oo sidaa sameeya waxaa laga yaabaa in lacagta naqdiga laga jaro ilaa iyo 10 sanadood.

Caruurtaada way heli karaan manfacyada Mudnaanta Qoyska [Families First] AMA manfacyada Kuubannada Cuntada [Food Stamps] laakiin adiga ma heli kartid haddii aad adigu tahay:

- Dambiile cararaya
- Maxbuusle edeb lagu daayay ama xad gudub ku sameeyey tijaabo lagu eego edebta maxbiislaha
- Lagu heley dambi daroogo la xiriira ee la galey inta ka dambeysey 22 Agoosto, 1996, aysan ka ahayn haddii aad ka soo baxdo waxyaabo gaar ah.

Shaqaalaha kiiskaaga ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyaabaha ka baxsan.

Si aad uhesho lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska, waa in aad saxiixdaa oo aad raacdaa Qorshaha Mas'uuliyadda Shaqsiga. Qorshahan waxaa laga yaabaa in uu kaaga baahan yahay in aad qabato howlo shaqo la xiriira.

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan Masruufka Caruurta iyo Mudnaanta Qoyska:

Waxaa laga yaabaa in isla mar aad wada hesho lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska iyo masaruufka caruurta. Haddii aad qaadato Mudnaanta Qoyska [Families First], waa in aad naga caawisaa in aad inoo cadeyso canuga aabahii dhalay. Sidoo kale waa inaad nala shaqeysaa si aan uga qaadno masaruufka canuga ee caruurta hela manfacyada Mudnaanta Qoyska. Inaga iskuma dayi doono in aan masaruuf ka qaadno haddii aad

inoo caddeeyso in ay jiraan sababo wanaagsan oo ah in aadan taa sameyn karin. Dhammaan masruufka ilmaha waa in marka hore gacanta loo geliyaa xafiiska DHS. Haddii waalidka si toos ah uu lacag kuu siiyo, waa in lacagta aad u soo dirtaa xafiiska DHS. **Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo masaruufka caruurta oo dhan ama qaar ka mid ah in dib laguugu soo celiyo.** Waxaan ugu yeeraanaa lacagahan masruufka canuga ee inaga nala soo mariyo.

Xaddiga masaruufkaaga canuga ee la soo dhexmarsiiyo waxay ku xiran tahay “baahidaada aan la buuxin” iyo caddada masaruufka ee lagu siiyay midkooda. Inaga ayaa xisaabayna baahidaada aan la buuxin oo waxaan ku saleyneyna:

- Inta qof ee looga talagalay lacagta lagu siiyo ee aad ka hesho Mudnaanta Qoyska
- Inta ay la eg tahay daqliga kale ee ku soo gala
- Shaqaalaha kiiskaaga ee DHS waxaad weydiin kartaa inta ay tahay caddada baahidaada aanla dabuulin.

Ma dooneysaa in aad isqorto si aad u codeyso doorashada soo socta? Sharciga dowladda dhexe iyo sharciga gobolba ayaa nagu qasbaya in aan ku weydiino haddii aad dooneyso in aad iska diiwaangeliso si aad u codeyso. Su'aashan waxaa lagu waydiin doonaa mar kasta oo aad manfac soo dalbato ama aad dib u dalbaneyso, marka dib laguugu ogolaado manfacyada, ama haddii aad soo waddo in aad noo sheegto in aad guurtay. Foormamka dhan buuxintooda inaga ayaa kaa caawin doona.

Macluumaadka Diiwaangelinta Codeynta:

- Manfacyada laga yaabo inaad ka hesho xafiiska WAB [DHS] isma baddeli doonaan haddii aad isdiiwangeliso in aad coddeeyso ama in kaleba.
- Waan kaa caawin karnaa in aad buuxsato. Go'aanka ah in caawinaad aad doonaysid iyo in kale adigaa iskaleh. Foormka si qarsoon aad u buuxin kartaa.
- Waxaad cabasho udirsan kartaa Isuduwaha Coordinator of Elections, Secretary of State's Office, 900 William R. Snodgrass Tennessee Tower, Nashville, TN 37243, 1-615-741-7956, Tennessee Relay Center, 1-800-848-0299, haddii aad aaminsan tahay:
 - In qof faragalin ku sameeyey xuquuqdaada ah in aad isdiiwaangeliso ama qof kuu diidey in aad isdiiwangeliso si aad u codeyso.
 - In qof faragalin ku sameeyey xuquuqdaada ah qarsoodiga oo kuu diidey in aad isdiiwangeliso si aad u codeyso.
- Haddii aad doorato in aad isdiiwaangeliso ama diido, uma sheegi doono cid ka baxsan guddiga doorashada arrinka ah dalabkaaga ama halka aad ka buuxisay. Tani waxa kaliya aan u isticmaali doonaa diiwaangelin awgeed.
- Ma codeyn kartid ilaa aad ka hesho kaarka diiwaangelinta codeynta. Haddii kaarka uusan kugu soo gaarin seddex sitimaan gudahood, ka xaqiiji Guddiga Doorashada.
- Guddiga Doorashada Degmada ayaa fiirin doonta haddii aad isdiiwaangelin karto si aad u codeyso. Tani laguma sameyn karo xafiiska DHS ama Xafiiska TennCare.
- Haddii arjigaaga aad boosto ugu dirto xafiiska doorashada ee degmadaada, marka ugu horeyso ee aad codeyneyso waa in aad isgaysaa oo aad soo codeysaa.
- Waxaan boostada kuugu soo diri doonaa foormka “Arji Boosto ee Isdiiwangelinta Doortaha” 30 maalmood gudahooda haddii aad telfoon inoogu sheegeyso ama internetka ingoogu soo gudbineyso:
 - Haddii adreskaaga aad beddasho
 - Arjiga
 - Dib ubuuxiinta
 - Dib ucusbooneynta
 - Dib-u-eegid

Haddii waqtiga la isdiiwaangeliyo ka dhiman yahay in ka yar 30 maalmood, foormka waxaan kuu soo diri doonaa 5 maalin gudahooda ama maalinta shaqada ee xigta haddii aan karno.

HIPAA:

Sharciga dowlada dhexe ee **HIPAA** wuxuu qorayaa waa in aan xafidnaa xaqiiqooyinka ku saabsan caafimaadkaaga si qarsoodi ah. Sidoo kale sharciga wuxuu leeyahay waa in aan ogeysiiskan ku siinaa. Waakuwan xeerarka la inooga baahan yahay in aan raacno si aan u xifdinno xaqiiqooyinka ku saabsan caafimaadkaaga qarsoodiga. Xeerarkan way isbaddeli karaan. Haddii isbaddel muhiim ah la sameeyo, inaga ayaa kuu soo sheegi doona.

Si loo go'aamiyo in aad xaq u leedahay Mudnaanta Qoyska [Families First], waxaa laga yaabaa in DHS ay macluumaadka caafimaadkaaga qarsoodiga ah la wadaagto:

- Qaar ka mid ah shaqaalaha Waaxda oo u baahan in ay go'aamiyaan haddii aad qaadan karto manfaca Mudnaanta Qoyska [Families First].
- Sidoo kale DHS waxaa laga yaabaa in ay macluumaadkaaga caafimaadka qarsoon la wadaagto Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka ee dowladda dhexe maxaa yeeley waxay bixiyaan oo ay kormeeraan barnaamijka Mudnaanta Qoyska [Families First].

Adigoo fasax hore oo qoraal ah lagaa hayo, xafiiska DHS waxaa laga yaabaa in macluumaadkaaga caafimaad ka gaarka ah ay la wadaagaan shaqsiyaad kale ama xarumo, sida daryeel bixiyaashaad caafimaadka, qareen, iyo/ama xubno ka mid ah qoyskaaga.

Haddii aadan awoodin in aad bixiso idin hore oo qoraal ah, xafiiska DHS waxaa laga yaabaa in ay macluumaadkaaga caafimaadka gaarka ah la wadaagto:

- Wakiilka awoodda u leh—kaasoo sidoo kale xaq u leh in uu bixiyo idin qoraal ah ee lagu sii daynayo macluumaadkaaga caafimaadka shaqsiga ee la siinayo shaqsiyaad kale ama xarumo;
- Xubin qoyska ama kuwo kale ee ku lugta leh daryeelka caafimaadkaaga. Waad na weydiin kartaa in macluumaadkaaga aanan iyagu usheegin. Haddii aan karno waan ku raaci karnaa. Haddii aad tahay canug yar ama aad ku jiro qolka emerjensiga, waxaa dhici karta in aanan isku raacin.

Idin hore la'aan, sidoo kale waxaa laga yaabaa inay macluumaadkaaga caafimaad la wadaagto:

- Hay'adda kor ka ilaalisa caafimaadka ama sharci fulinta sida sharciga uga baahan yahay ulajeedaduna tahay baaritaan xatooyo ah ama eeddeyn khiyaamo la xiriira helitaanka manfacyada barnaamijka;
- Shaqsi ama xun kale oo kasta, oo ay ku jiraan sharci fulinta iyo hay'addaha dowladda kale, marka sharciga uu ugoal yahay ama marka uu uga baahan yahay oo ay maxkamadda amarto.
- Shaqsi kale ama xarun ee ay ulajeedaduna tahay baaris, sharcigana u ogolaado.

XUQUUQDA KU SAABSAN MACLUUMAADKA CAAFIMAADKAAGA

Waxaad xaq u leedahay inaad:

- Aragto diiwangelinta caafimaadkaaga, aysan ka ahayn marka sharciga uu xadido.
- Aad hesho nuqdooyin diiwangelinta caafimaadkaaga, aysan ka ahayn marka sharciga uu xadido.
- Inagala hadasho sida aan u isticmaali doono ama aan u wadaagi doono macluumaadka caafimaadkaaga.
- Na weydiiso isbaddel ah macluumaadka caafimaadka ee ay kula tahay in uu qaldan yahay. Waa in si qoraal ah aad na weydiisaa in aan baddelno oo aad noo sheegtaa sababta. Waxaa dhici karta in aanan awoodin in aan baddelno. Haddii inagu aanan baddeli karin, waan kula soo socodsiin doonaa sababta.
- Na weydiiso in aan wadaagin qaar ka mid ah macluumaadka caafimaadkaaga ku saabsan. Waa in aad si qoraal ah aad nooga soo sodsataa. Waa in aad inoo sheegtaa waxa ay tahay xaqiiqada ah in aadan dooneyn in la wadaago. Waa in aad inoo sheegtaa kuwa ay yihiin ee aadan doonayn in aan xaqiiqadaha aanan la wadaagin. Laakiin, mararka qaarkood waxaa dhici karta in aan kugu raaci karin codsigaaga. Inaga ayaa kuu sheegi doona sababta.
- Waa in aad dib ula noqotaa okeydaada ah wadaagista macluumaadka caafimaadkaaga. Haddii aad saxiixday foorm ogolaansho ah, dib ayaad uqaadan kartaa marka aad doonto. Laakiin, waa inaad si qoraal ah u soo dalbataa. Tani waxba kama baddeleyso xaqiiqo kasta ee aan horeyba u wadaagnay.
- Na weydiiso inaan qaab kale ka duwan aan kula soo xiriirno ama cinwaan ama adreeskaaga ka gedisan. Waa inaad si qoraal ah usoo weydiisataa.
- Na weydiiso nuqdi ah hab dhaqanka qarsoodiga ee DHS.

WIXII SU'AALO ama CABASHOYIN AH

Miyaad qabtaa wax su'aalo ah oo ogeysiiskan ku saabsan? Fadan wac 1-888-863-6178. Degmada Davidson County, wac 313-5790. TTY#1-800-270-1349.

Ma qabtaa wax cabasho ah oo ku saabsan sida wax looga qabtay macluumaadka caafimaadkaaga gaarka kuu ah? Waad soo wici kartaa ama waxaad u soo qori kartaa mid ka mid ah xafiisyada hoos ku qoran si aad su'aalo u weydiiso ama aad cabasho u gudbis. Ma lumin doontid ama lagaama go'yn dooni xaq ulahaanshaaga haddii aad cabasho soo gudbis ama aad su'aallo weydiiso.

Sida uu qabo sharciga xuquuqda madaniga ee dowladda dhaxe iyo Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA) xeerarka xuquuqaha madaniga iyo sharciyada, USDA, waaxaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaha, iyo xurumaha ka qaybqaata ama maareeya barnaamijyada USDA ay bixiso waxaa ka mamnuuc ah in wixii takoor ah oo lagu saleeyo jinsi, midab, asal qaran, jinsi, caqiido, naafanim, da', siyaasad ama aargudsi ama aar-gudasho howlo kale ee aad horey ugu jirtay darteed ee la xiriira barnaamij kasta ama howlo kale ee ay hay'adda qaban jirtay ama USDA ay maalgelisay. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaabab kale oo hay'adda lagula soo xiriira sida in ay macluumaad ka helaan oo u baahan ama isticmaala (tusaale ahaan Braille, daabacaad far wa wayn, cajal, Luqadda Dhagoolayaasha, iwm.), waa inay la soo xiriiraan Hay'adda (Gobolka ama degmada) waa halka cayrta ay ka dalbadeen. Dadka maqalka dhibka ku ah, maqalka ku adag ama hadalka dhib ku ah waxaad u wici kartaa USDA iyagoo Federal Relay Services in maraayaan (800) 877-8339 Waxaa intaa dheer, barnaamijyada aan bixinno oo luqad aad fahmi karto ama luqaddaada aad ku hadasho oo aan af Ingiiir ahayn ayaan kuugu soo diri karnaa. Haddii aad jeceshahay inaad soo gudbis cabasho takoor ah oo ku aaddan Barnaamijka Xuquuqda Dad-weynaha USDA u soo dirsato, soo dhammaystir Foormka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA ee (AD-3027) aad ka helaysid qatka online-ka ee http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, oo waxaad ka heli kartaa xafiis kasta ee USDA leedahay si foormka aad u codsato. Si aad u dalbato nuqdi ka mid ah foormka cabashada, soo wac (866)632-9992 si foorm aad u dalbato. Foormka cabashada oo dhammaystiran ama warqadda waxaad ku soo diri kartaa boostada oo u dir U.S Department of Agriculture, Office of the Assistant Secretary for Civil Rights, 1400 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20250-9410, ama fakis (202) 690-7442 ama email ku program.intake@usda.gov. Usoo qor HHS, Director, Office for Civil Rights, 200 Independence Avenue, S.W., Room 509F HHH Bldg., Washington, D.C. 20201 or call (202) 619-0403 (cod) or (202) 619-3257 (TTY). USDA iyo HHS waa loo shaqeeye fursadda u wada sima shaqaalaha iyo kuwa bixiya. Sidoo kale waxaad u soo qori kartaa Tennessee, Department of Human Services, Office of General Counsel, Citizens Plaza Building, 400 Deaderick Street, Nashville, TN 37243, (615) 313-4700.

Xuquuqdaada ah in dacwad dhegaysi hufan oo cadaalad ah aad ka qaadato:

Ka waran haddii aadan ku raacsanayn go'aaminka aan ka gaarno arjigaaga ama kiiskaaga? Waxaad dalban kartaa rafcaan ah dhegaysi dacwad oo hufan. Adiga nafsi ahaantaada ayaa ka hadli kara dhegaysiga dacwadaada ee maxkamadda. Sidoo kale waxaad la iman kartaa saaxiib, qaraabo, ama qareen [lawyer] adiga kuu hadla. Ka dib marka aan jawaabta kuu so dirno, waxaad heysataa 90 maalmood in aad rafcaan ka qaadato manfacyada Mudnaanta Qoyska iyo Kuubannada Cuntada. **Haddii aad dooneyso in ay kuu socoto manfacyada ama cayrta lagu siiyo inta racfaankaaga go'aan laga gaarayo, waa inaad 10 maalmood gudahooda soo weydiisataa Mudnaanta Qoyska iyo Kuubannada Cuntada [Families First and Food Stamps]. Haddii rafcaanka aad ku guulaysan weydo, waxaa laga yaabaa inaad dib u bixiso manfacyada ama cayrta lagu siiyay ee qaaday inta ay socdeen howsha racfaanka ee la go'aaminaayay.** Haddii aad dooneyso in rafcaan aad qaadato, u sheeg shaqaalaha kiiskaaga ee xafiiska DHS jooga. Sidoo kale waxaad Xarunta Adeegga Gaargaarka Qoyska ka soo wici kartaa 1-866-311-4287. Telfoonkan waa wacitaan bilaash ah.

Idan lagu bixinnayo diiwaangelinta isa soo xaadirista [attendance] iskuulka:

Aniga oo ah (macmiilka) waxaan iskuulka idan ku siinayaa ama u fasaxayaa inay bixiyaan diiwaangelinta soo xaadiristaanka [attendance] caruurteyda ay siin karaan Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee [Tennessee Department of Human Services] oo ay bixiso Waaxda Waxbarashada ee Tennessee ama iskuulka canugayga ama carruurteyda dhigtaan. Waaxda Adeegga Aadanaha wuxuu diiwaangelintan uu u isticmaali doonaa, oo ay

ku jirto lambarada soshal sekiyuuritiga, in uu iga caawiyo in ka soo baxo waajibaadyadeda Mudnaanta Qoyska iyo diiwangelinta waa la baabi'in doonaa ka dib markii la dhamaysto.

Idan la igula soo xiriir karo:

Waan ku raacsannahay in DHS ay igala soo xiriiri karto dhanka Boostada Mareykanka iyo telfoon lambarka ku qoran arjigeeyga, oo fariin ayaa la ii dhaafi karaa haddii aanan aniga markaa la i helin, sida looga baahan yahay in aan bixiyo macluumaad ku saabsan arjigeeyga ah manfacyada/adeegyada ama manfacyada/adeegyada ee aan horeyba u helo.